



Reimagining Education During the Pandemic

**PORTLAND
PUBLIC SCHOOLS**



Wararkii U Dambeeyey: Fasaladii Waxbarashadu Waa Sii Socon Doonaan Marka Cimiladu Xumaato Waqtiga Ardaydu Guryaha Waxbarashada Ku Qaadanaayan

Noofembar 13, 2020

Qoysaska Qaaliga ah ee PPS,

Barafka ka da'ayaa buuraha Cascades todoobaadkani waxa ay ina xasuusineysaa dhammaanteen in la soo gaaray sidii caaadada ahaan jirta waqtigii sanadka ay cimiladu ay xumaan jirtay. Sidii aan awalba diyaarka ugu ahaan jirnay ayaan diyaar baan u nahay duufanada xilliga jiilaalka, laakiin waqtigan qaabka aan u shaqeyneynaa aad iyo aad bay uga gedisan tahay sida uu ina faray xanuunka COVID-19, iyada oo ardaydii dugsiyada waxbarashada ku qaadana jirtay ay hadda ay Guryahooda Waxbarashadii ku qaadanaayan.

Waxbarashada Dhammeystiran ee Guryaha Lagu Qaadanaaya Waxa, inta badan, sii socon doontaa inta lagu gudo jiro waqtiga cimiladu ay xun tahay taasi oo waqtiyada caadiga ah inta badan aynu si degdeg ah dugsiyada u xiri jirnay ugu dhawaaqi jiray "maalintii barafka." Tani waxa ay inoo oggolaan doontaa sidii aan u ilaali lahayn maalmaha waxbarashada marka ay suurtagal tahay. Nabadgelyada ardayda iyo shaqalaha mar walba waxa ay tahay waxa aanu siino mudnaanta koowaad; waxbarashada guryaha lagu qaadanaayan macnaheedu waxa ay tahay waxaa jirta khatar aan loo baahneyn in loo kala socdaalo xilliga dayrta dhismayaasha iskuulada. Mararka ay korontadu tagtay iyada oo ay sababeen duufanada dhacaya ama waxyaabo kale oo is hortaagi kara waxbarashada guryaha lagu qaadanaayo, waxa aanu hubin doonaa in aanay ardaynu wajahin wax ciqaab ah.

Cimilada oo xumaataa waxa ay sidoo kale raad ku yeelan kartaa hawlihii ka socday dhismayaasha iskuulada waqtigani ay ardaydu guryaha waxbarashadoodii ku qaadanaayan. Addeegyadaasi waxaa ka mid ah, cuntada ardayda guryahooda loogu geynayo, daryeelka xannaanada caruurta ka jira goobaha iskuulada PPS, tababaradii ciyaaraha ardayda dugsiyada sarre iyo wixii kale ee hawlaha ah ee ka jira goobahaasi. Waxa aynu raaci doonaa nidaamka u dejisan waqtiga ay cimiladu xumaato kuwaasi oo aan ku go'aan qaadaneyno haddii hawlahaasi la sii wadi karo, iyada oo aan idin kula socodsiiin doono wixii cusub ee marba soo kordha anaka oo isticmaalayna kanaalo dhowra ah, oo ay ka mid yihiin telefoonada iyagu isdira, emails, fariinta degdeg ah, baraha bulshadu ku xiriirto iyo shabakadayada ([halkan guji si aad waxa badan oo ku saabsan kanaaladaasi uga ogaato](#)).

Waad mahadsan tiihin.